

GOOBAHA LAGASOO XIDHIIDHAYO CAAWINTA

Child Care Aware ee WA (Kawarqabka Daryeelka Cunuga)

Karaadi bixiyaasha daryeelka cunuga
ee sharciyaysan ee bulshadaada.

www.childcareawarewa.org

1-800-446-1114

Hubinta Daryeelka Cunuga

Karaadi taariikhda bixiyaha sharciyaysan,
warbixinaha maaraynta iyo waxkaloo badanba.

www.findchildcarewa.org

Washington Xiriirada

Codso child care subsidy (kabka daryeelka cunuga).

www.washingtonconnection.org/home

1-844-626-8687

Gobolka Washington Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta ee Gobolka Washington, Dhalinyarada iyo Qoysaska)

P.O. Box 40970

Olympia, WA 98504-0970

Teleefon lacag la'aan ah: 1-866-482-4325

www.dcyf.wa.gov

*Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah
ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent
Relations (Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060,
ConstRelations@dcyf.wa.gov).*

DCYF PUBLICATION EPS_0019 SM (09-2022) Somali


RAADINTA DARYEELKA TAYADA LEH EE CUNUGA

*Tilmaamta daryeelka cunuga iyo
fursadaha barbaarinta cunuga
ee Gobolka Washington.*



EARLY ACHIEVERS waxay kaa caawin karaan inaad hesh

DARYEEL TAYO SARE LEH



Kaqayb qaatayaasha Early Achievers waxa ka go'an daryeel cunug oo tayo leh iyo
hagaajin aan kala go'o lahayn. Waxay muujinayaan ka go'naansho si ay ugu qalmaan
markaa waxaad dareemi doontaa kalsooni ku saabsan doorashada daryeelka
cunugaaga. Marka aad dooranayso daryeelka cunuga, xasuusnow inaad raadiso
loogada oo aad waydiiso hadii bixiyahaagu kaqayb qaadanayo Early Achievers.

Kaga bogo faahfaahin ku saabsan Early Achievers www.dcyf.wa.gov/early-achievers.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

www.dcyf.wa.gov/early-achievers



DARYEELKA SHARCIYAYSAN *wuxuu kaa caawinayaa* in caruurtaadu ay noqdaan **KUWO BADQABA**

Gobolka Washington Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta; Dhallinyarada; iyo Qoysaska, DCYF) waxay sharci siisay inka badan 5,000 oo goobaha daryeelka cunuga ah.

Xarumahan waxay raacaayaan shuruucaha sharciyaynta gobolka si ay u hubiyaan in caruurta ay badqabaan iyo deegaan caafimaad qaba si looga caawiyo koritaanka caruurta.



KABKA DARYEELKA CUNUGU WUXUU KAA CAAWIN KARAA INAAD BIXISO DARYEEL TAYO SARE LEH

Miyaad garanaysaa caawimada ay siiso DCYF qoysaska ku haboon caawinta lacag bixinta ee daryeelka cunuga? DCYF Child Care Subsidy Programs (Barnaamijyada Kabka Daryeelka Cunuga) waxay bixinaysaa qayb kamid ah kharashaadka xarumaha daryeelka cunuga iyo family, friend, or neighbor (qoyska, asxaabta, ama jaarka, FFN) bixiyaasha. Waalidiinta ayaa laga yaabaa inay mas'uul ka yihiin kharashka caafimaadka bixiyahooda bil kasta.

Raadi hadii aad u qalanto! Ku haboonaanshaha dakhligu waxay kordhisaa iyo kharashaadka caafimaadka ee la dhimay. Hadii aanad horey ugu qalmayn, waa inaad hada u qalantaa. Ku codso adigoo ka cawaya telefoonka 1-844-626-8687 ama si onlaayn ah www.washingtonconnection.org/home.

Wax badan ka ogow kabka onlaaynka ah <https://www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/getting-help>.

LIISKA DARYEELKA CUNUGA

Liiskan wuxuu ka caawinayaa qoyskaaga inay doortaan daryeelka cunuga ee saxda ah.

Ilmahaygu halkan ma ku hormari doonaa?

- Dhaqammada, qowmiyadaha iyo awoodaha kala duwan miyaa la qiimeeyaa?
- Shaqaaluhu ma dhiirrigeliyaan hal-abuurka iyo madax-bannaanida da'da ku habboon?
- Isla dadkaa si joogto ah ma u daryeeli doonaan ilmahayga?
- Carruurta ma loo raaxeeyaa markii loo baahdo?
- Shaqaaluhu ma qabtaan oo way salaaxaan dhallaanka iyo socod-baradka inta badan, oo ay ku jiraan inta ay quudinayaan?
- Ilmahaygu halkan ma ku baashaali doonaa?



Waa maxay siyaasadaha saameyn doona isdhexgalka cunugeyga ee dadka kale?

- Miyaa shaqaaluhu dajiyaa xadidaado macquul ah, waadix ah, joogto ah, oo koritaan ahaana ku haboon?
- Miyaa shaqaaluhu isticmaalaa cod dagan oo caruurta ku jihaynayaan hawlaha kale hadii dhibaato jirto?
- Maxaa dhacaya marka caruurta is dagaalaan, isqaniinaan, ama is jiid-jitaan?
- Sidee barnaamijku uga qayb qaataa qoysaska?
- Miyaa laygu dhiirrigeliyey inaan waqti ku qaato marti ahaan qado ahaan ama tabaruc ahaan?
- Sideen ku maqli doonaa maalinta ilmahayga?
- Miyaan dareemayaa ixtiraam sida macallinka ugu horreeya uguna muhiimsan ee ilmahayga?



Muxuu ilmahaygu la kulmi doonaa maalintii?

- Hawlaha qorshaysan ma yihiin kuwo ka caawinaya cunugayga inuu waxbarto?
- Waqtiyada nasashada miyay ku saleysan yihiin baahida ilmo kasta?
- Miyaa lagu ixtiraamaa dhaqamada qoysaska waxqabadyada iyo xafladaha?
- Miyaa cunugaygu uu u helayaa wakhti maalin walba inuu ordo, wax tuuro, qabto, ama uu fuulo?
- Ma la helikaraa buugaag koritaan ahaan ku haboon cunugayga oo ku qoran luuqadiisa hooyo?



Deegaanku ma badqabaa oo ma caafimaad qabaa?

- Ma jiraan xubno shaqaale oo ku filan si ay uga warqabaan cunug walba?
- Ma jiraan talaabooyin amni oo goobta kajira si looga ilaaliyo waxyaabaha qariibka ah inay caruurta si dag-dag ah ugu baxaan?
- Ma jirtaa goob dibada ah oo badqabta oo lagu ciyaaro?
- Ma jiraan boolbarooyin iyo agab badqaba oo koritaan ahaana ku haboon?
- Waa maxay qorshaha dag-daga ah ee qoysaska lagala soo xidhiidhayo?



*Xasuu snow si aad u waydiiso hadii ay kaqaybqaadanayaan **Early Achievers!***